

1.4 Ma u baahan tahay caawimada helida madadaalada iyo xalalka nasniinta ilmahaaga yar?

Xalalka daryeelka ilmaha kala duwani oo aan helli karo maxay yihiin?

Daryeelka ilmaha guriga ku salaysan:

Carruurta (carruurta jirta ilaa lix sano) waxaa lagu hayaa xarumo ay ka shaqeeyaan shaqaale bixinaya daryeel iyo barnaamijyo waxbarasho si wax looga qabto baahida koritaan ee ilmaha.

Daryeel Marmar ah:

Daryeelka Marmarka ahi wuxuu u bixiyaa daryeel ilmood siyaaba kala duwan; qaarkood waxay ku shaqeeyaan xarumaha bulshada agtaada ah waxayna bixiyaan adeegyo roggromi kara.

Daryeelka Nasniinta:

Daryeelka nasniintu wuxuu siiyaa waalidiinta fasax ay ka qaataan doorka daryeelka. Nasniintu waxay ka dhici kartaa guriga ama waxay noqon kartaa dhaqdhaqaaq ka dhacay guriga dibadiisa.

Daryeel Maalmeedka Qoyska

Ilmahaaga waxaa lagu daryeellaa qof kale gurigiis. Barnaamijka Daryeelka Qoyska waxaa sameeya Golahaaga Degmada.

Inclusion Support Subsidy (ISS) ayaa la helli karaa si loo caawimo Xarumaha Daryeelka Ilmaha/bixiyayaashu u diyaariyaan ilmo qaba baahi gaara. Si aad wax badan uga ogaato Inclusion Support Subsidy la xiriir Wasaarada Qoysaska, Gurisiinta, Adeegyada Bulshada iyo Arrimaha dadka Asaliga ah tel: 1300 653 227.

Sidee fasax ku helli karaa?

Commonwealth Respite and Carelink Centre

ayaa awoodi doona inay ku siiyaan macluumaad ku saabsan xalalka nasniinta ee agagaarkaaga. Wac 1800 059 059 waxaana lagugu xiri doona xarunta kuugu dhow.

Ma jiraan xalal madadaalo oo carruurta ka yar 5 sano?

Waxa jira xalal badan oo carruurta baahi siyaada ah qaba kana yar da'da 5 sano. Kuwa la helli karaa badankood waa barnaamijyo loo dhan yahay carruur da' walba ahna lagu soo dhowaynayo.

Macluumaad ku saabsan jiiimka carruurta, kooxaha wada cayaara iyo xalalka kale ee madadaalada meesha ugu fiican oo aad ka bilaabi kartaa waa golahaaga degmada. Golaha degmadu wuxuu kaloo kuu sheegi karaa wixii ku saabsan guryaha neighbourhood houses kuwaas oo laga yaabo inay wadaan barnaamijyo aan loo xayeysiin. Arag xaashida macluumaad kitkan 4.7 'Sidee ula xiri karaa golahayga degmada?'

Waa maxay qiimaha daryeelka ilmuhu?

Lacagta daryeelka ilmaha waa isbedeshaa iyada oo ku xiran xalka aad doorato sida waafaqsan dakhliga qoyska. Kharajyada daryeelka ilmaha qaarkood waa la kabaa. Wac Centrelink tel: 131021 ama booqo www.centrelink.gov.au si aad u hesho wax intaas ka badan ama wac **Khadka Hellida Daryeelka Ilmaha (Child Care Access Hotline)** tel: 1800 670 305.

Yaa I caawimi kara si aan u doorto?

Playgroup Victoria - waxay leeyihiin **Xiriiriye la Taageero oo Kooxda Wada-cayaarta** kaas oo awoodi doona inuu ku caawimo koox wada cayaar oo loo dhan yahay. Waxaad ka wici kartaa tel: 1800 171 882.

Haddii aad dooratay xalkaaga ilma haynta aadna doonayso inaad xaqijiso inay wax ka qabanayso baahidaada weydii Xiriiriyaha Xarunta Daryeelka iyada oo uu kula jiro **Tas-hilaad sameeyahay Kaalmada U-dhamaanta**. Waxay caawimi doonaan helida macluumaad khaasa oo lagama maarmaan ah oo ilmahaaga.

Sidoo kale, **Pre-School Field Officer** (Sarkaalka Rugta Dugsiga ka hor) wuxuu siiyaa kaalmo carruurta qabta baahi siyaada ah oo haysta meelaynta kindergartenka 4ta sano jira oo kharajka lagu bixiyey. Sarkaalka Rugta Dugsiga ka-hor wuxuu xaqiijin doonaa in kindergartenkaagu gaar u yahay ilmahaagu kuna xiran yahay Golaha degmada.

Haddaad raadinayso koox kula dhaqan ah la xiriir Xarunta Awoodgelinta Soogalootiga agtaada ah. Meelaha lagala xiriirayo arag xaashida macluumaadka ee kitkaan 4.1. 'Ma ku hadashaa af aan ka hayn Ingiriis'.

Waxaad kaloo awoodaa inaad la xiriirto neighbourhood agtaada ah ama guriga bulshada ama Xarunta Caafimaadka iyo Dhallaanka Hooyada wixii macluumaad ah ee ku saabsan kooxaha wada cayaara iyo daryeelka ilmaha.

Ma jiraa qof iga caawin kara raadinta xalalka nasniinta iyo madadaalada? Haddii aad ku nooshahay xaafadaha waqooyiga wac Xiriiriyaha **Northern Parent Support Program** tel: 9385 3235 ama haddii aad ku nooshahay xaafadaha Galbeedka la xiriir Xiriiriyaha **Parent to Parent West** tel: 9680 8444. Waxay awoodi doonaan inay kaa caawimaan wixii su'aalla oo laga yaabo inaad qabto oo ku saabsan nasniinta ama madadaalada.